

## Adigoon Digniin Qabin Daafaha Adduunyada

## Yaan Aaydhis kugu dilin

A

B

1. Soomaali dibaddiyo
2. Waxaan daacad ugu iri
3. Yaan Aaydhis kugu dilin
4. Farrintaan kusoo durug
  
5. Cudurrada dilaaga ah
6. Kii ugu darraayoo
7. Dawo aan lahayn iyo
8. Dilaa weeye cuduroo
9. Doc kastaba u fidayoo
10. Weli dooni qaar kale
  
11. Diin kastaba ha haystee
12. Dilaagani ku fidayaba
  
13. Degaamada Adduunyada
14. Cudurka ugu daranoo
15. Docda hoose kaga yaal
16. Ayuun bawgu sii daran
  
17. Jabuutida docdeeniyo
18. Keenyada dadkeennii
19. Suudaan dacalladeediyo
20. Taariikhda duugga ah
21. Duumo iyo Qaaxiyo
22. Wixii ay dad laayeen
23. Intii Aaydhis diley-baa
  
24. Soomaalaay dilaagani
25. Dadaal ka hortag mooyee
26. Dariiqaduu ku fidayana
27. Waxaa loogu dawgalay
28. **Dhiig laysu deeqoon**
29. **HIV-ga laga deyin**
30. **Mandheertiyo dunteediyo**
31. **Cunuggii ay dihataba**
32. **Ugu dawin karaysaa**

- Dalka qaybta joogtaba  
Adigoon digniin qabin  
Daafaha Adduunkee
- Ee dunida soo maray  
Dadow kahortag meeyee  
Aaydhis baa dalkii yimi  
Dacallada aduunyada  
Malaayiin qof dilayoo  
Inuu Aakhiro u diro
- Qofkii mara dariiqadani  
Cudurkaani deyn maa
- Afrikada dadkeedaa  
Weliba dalalka saxaraha  
Ee deriska aan nahay
- Dalka reer Itoobiya  
Iska wada dangiigiyo  
Ugaandhaaba ugu daran  
Dib haddaan u eegnana  
Dagaallada sokeeyuhu  
Marka laysku wada daro  
Dadweynow ka tiro badan
- Degganaansho guud iyo  
Ogow daawo malahoo  
Aan kuu daliishee  
**Gogol dhaaf la doontiyo**  
**Cudur daadaheeyaha**  
**Hooyo cudurku degeshadey**  
**Danbarka caanaheeday**  
**Cudurkaaan dilaaga ah**

## A

33. Aaladaha ditoorrada  
 34. Disinfektantigii iyo  
 35. Durriinka iyo dhaymiyo  
 36. Dalqadoo la gooyiyo  
 37. Wax kastoo dub sara oo  
 38. Jeermigoo an laga dilin  
 39. Waa dariiqo kale oo  
 40. Dadweynow ogsoonow

41. Haddaan kuugu sii daro  
 42. Dab in layska qaatiyo  
 43. Doon laysla raaciyo  
 44. Durdur lagu qubaystiyo  
 45. Dadkoo oon wadaagiyo

46. Qofka cudurku degeshado  
 47. Awoodduu dilaayoo  
 48. Shuban uu ku daahiyo  
 49. Diriq uu ka dhuubtiyo  
 50. Dubka iyo maqaarkoo  
 51. Qanjabarar ka daahira  
 52. Dadka looga soocaa

53. Dalka inuu ka jiro iyo  
 54. Loo hayn daweyn iyo  
 55. Dadka ugu gudbaayaba  
 56. Dariiqa u habboonee  
 57. Ila soco dadkaygow

58. Waa tii Daa'imkeen yiri  
 59. Doonananaa ha joogtee  
 60. Zino daalibkeedee  
 61. Dadow ha u dhowaanina  
 62. Taas iyo daraadeed  
 63. Macsi yaan la doonane  
 64. Aan ka joogno dibadaha  
 65. Dilaagani ku faafana  
 66. Si Digtoonni loo helo

## B

- Dadweynaha qalaayoo  
 Istuufada u diidiyo  
 Rayiislaha docdaadiyo  
 Daan gaws ka bixintiyo  
 jirka dhiig ka daadshoo  
 Dadka lala wadaagaa  
 Dilaagani ku faafee

- Dilaagaani kumafido  
 Gaadiid dadweyniyo  
 Dariiq laysla qaadiyo  
 Berked lagu dabaashiyo  
 Derisow ma nabadbaa

- Difaacii jirkiisiyo  
 Xummad aad u daran iyo  
 Dushiisoo dhammaatoo  
 Qufac uga danbeeyiyo  
 Cun cun laga dareemiyo  
 Ayaa duulka kale iyo

- Inuu yahay dilaa aan  
 Haddaan sheegay dawguu  
 Waxaan kuugu darayaa  
 Dadku uga hortegayee

- Inaan dalaq niraahnoo  
 Dadow ha u dhowaanina  
**Walaa taqrabu zinaa**  
**Zino daalibkeedee..**  
**Yaan loo degdeginoo**  
**Dumar iyo rag labadaba**  
**Dariiqyada kaleetee**  
**Halla baro dadweynaha**

A

B

- |                              |                          |
|------------------------------|--------------------------|
| 67. Imminkana dadkaygow      | Aan kuugu daba karo      |
| 68. Waanadaydan doorka ah    | Mar hadduu dalkii yimi   |
| 69. Deriskana ku badan yahay | Daawona an loohayn       |
| 70. dadkeenuna u yaaceen     | Daafaha Adduunyada       |
| 71. Digtoonaanta cudurkaas   | Waa inaan dareenoo       |
| 72. Dumar iyo rag labadaba   | Laysu wada diyaarshaa    |
| 73. Oo aan dadweynaha        | Wacyigelinta laga deyn   |
| 74. Dar Alliiyo nasiibkiis   | Qofkii cudurku degeshado |
| 75. Waa inaan la dayrino     | Dadka laga takoorine     |
| 76. Isagana daryeellaa       | Sidii duray inuu qabo    |
| 77. Waxan ugu danbaynti      | Kugu iri dadkaygow       |
| 78. Si aan Aydhis kuu dilin  | Adigoon digniin qabin    |
| 79. Qof kastow dadaaloo      | Farriimahakan doorka ah  |
| 80. Deriskiyo naftaadiyo     | Gaarsii dadweynaha       |
| 81. Hadayicine kuna dhaqan   | Illeyn waa dantaadee..   |

**MMX Gaani, 01/01/2000**

**Tel: 002525755782/00252541743**

**Email: mmhgani@yahoo.com**